Regions Hospital

| Cinwaanka<br>Nidaamka Kaalmada Dhaqaale | **Lifaaqyada**<br>☐ Haa ☒ Maya |
|---|---|
| **Erayada muhiimka ah** Aqbalida, Samafalka, Lacag Uruurinta, Deynta, Dhibaatada dhaqaalaha, is-cayminta, caymiska dhiman, caymis la'aanta | **Lambarka**<br>RH-BP-AD25:00:18 |
| **Qaybta** Dhaqannada Ganacsiga (Business Practices – BP) | **Taariikhda uu Bilaabanayo**<br>**1-1-16** |
| **Buug-gacmeedka** Maamulka | **Taariikhda Dib-u-eegista ugu Dambeeyey**<br>**02/2023** |
| **Waxaa Bixiyey** Maaliyadda | **Taariikhda Dib-u-eegista Xigta**<br>**02/2024** |
| **Khusaysaynta** Waxay khusaysaa kuwa ka raadinaya iyo/ama ka helaya healthcare (daryeelka caafimaadka) Regions Hospital (Isbitaalada Regions), kuwa bixiya lacagaha iyagoo ka wakiil ah Bukaanada Regions, shaqaalaha Isbitaalka, hay'adaha deyn ururinta iyo qareennada sharciga deynta. | **Taariikhda Bilowga Deynta**<br>**12-1-83**<br>**Taariikhda Dhammaadka Deynta**<br>**laguma dabaqi karo** |
| **Mas'uuliyadda Dib-u-eegista** Mas'uulka Sare ee Maaliyadda ee Regions | **La xiriir** Mas'uulka Sare Maaliyada ee Regions (CFO) |

**<u>Horudhaca</u>**

Regions Hospital waxaa ka go'an bixinta adeeg caafimaad oo tayeysan oo loogu talogaley bukaanadeena, kuwaasoo ay ku jiraan dadka u baahan caawin dhaqaale. Sidaas darteed, Nidaamkeena Kaalmada Dhaqaale (loo yaqaano "FAP" [Financial Assistance Policy] ama "Nidaamka") waxaa loogu talogalay bukaanada aan ku jirin ama kuwa ku jira caymiska xaddidan iyadoo lagu saleynayo awoodda bukaanka ee la xiriirta bixinta daryeelka deg-degga ah iyo daryeelada kale caafimaad ee lagama maarmaanka ah. Nidaamkeena waa la heli karaa si ay u bixiso caawimaad goos-goos ah; ma ahan mid looga gol leeyahay inay bixiso daryeel muddo dheer, lacag la'aan ah ama sicir-dhimis daryeel. Codsiga kaalmada dhaqaale ayaa ansax ahaan doona 12 bilaha taarikheed haddii codsi kale la soo gudbiyo mooyee. Codsiga kaalmada dhaqaale ayaa yeelan doona xaddidaad 2 sanno ah oo dib-u-eegis lagu samayn doono u-qalmitaanka adeegyada la bixiyay. Nidaamkeena waxay qeexaysaa oo sharraxaysaa shuruudaha u-qalmitaanka, qaabka aan u xisaabino sicir-dhimista, qaabka loo codsado kaalmada dhaqaale, bixiyeyaasha adeegga daryeelka ee Isbitaalkeena, iyo nidaamkeena daryeelka caafimaadka deg-degga ah. Bukaanadu waxay heli karaan nuqulo koobi oo lacag la'aan ah kuwaasoo ku saabsan Xeerkan iyo foomka lagu dalbanayo caawinta dhaqaalaha ee uu qofku si shakhsi ah uga dalban karo dhamaan goobaha diiwaangelinta bukaanada. Wixii macluumaad dheeraad ah ama su'aalo ah ee ku saabsan hannaanka codsiga, ama si ay ugu dalbadaan nuqulada iimaylka, bukaanadu waxay kala xiriiri karaan Patient Financial Services Department (Waaxdeena Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanada) lambarka 651-254-4791, ama lambarka 640 Jackson Mail Stop 11102S, Saint Paul, MN 55101. Nuqullada Caymiskan, foomka codsiga, iyo turjumaadaha ee bilaashka wada ah waxaa laga heli karaa barta www.healthpartners.com/fa

**<u>SHURUUDAHA U-QALMITAANKA:</u>**

Regions wuxuu u dejiyay shuruudaha u-qalmitaanka ee soo socda bukaannada si ay u helaan kaalmo dhaqaale:

- Bukaanka iyo xubnaha qoyska waxaa laga codsan karaa inay keenaan caddeyn muujineysa in loo diiday ama loo diidi karo macaashyada dowladda, sida Medicaid. Warqadda(Waraaqaha) diidmada macaashyada ee dawladda ayaa la codsan karaa.
- Bukaanku waa inuu yahay mid kasoo quustay dhammaan barnaamijyada kaalmo ee dawladda ee la heli karo bixiso iyo wax alla wixii macaashyo kale ah ee la xiriira caymiska caafimaadka.

- Bukaanku waa inuu buuxiyo Codsiga Kaalmada Dhaqaale ee Isbitaalka kadibna ku soo lifaaqo dhammaan dukumintiyada la codsaday.
- U-qalmitaanka bukaanka ee daryeelka lacag la'aanta ah ama daryeelka qiimo-dhimista lagu sameeyay waxaa loogu saleyn doonaa dakhliga qoyska iyo tirada xubnaha qoyska, iyo [arrimaha kale, tusaale ahaan. Hantida] ee soo socda:
    - Bukaannada waa inay keenaan dukumiintiyada hantida qoyska sida lacagta caddaanka ah iyo hantida kale si fudud lacag loogu beddeli karo si codsiga dib-u-eegis loogu sameeyo.
    - Hantida si fudud lacag loogu beddeli karo waxaa ka mid ah hantida lacagta lagu iibiyo ee sida fudud looga dhigi karo lacag, sida koontooyinka keydka iyo koontooyinka jeegga, saamiyada, dukumiintiyada deymaha, shahaadooyinka dabaajiga, dakhliga hawlgabka sannadlaha ah iyo koontooyinka suuqa lacagta. Lacagaha hawlgabka (tusaale ahaan 401K, lacagaha IRA iyo dakhliga hawlgabka sannadlaha ah ee dib loo dhigay) waa laga reebay hantida si fudud lacag loogu beddeli karo. Dukumiintiyada hantida si fudud lacag loogu beddeli karo waa in la codsado.
    - Hantida si fudud lacag loogu beddeli karo ee ka badan $20,000 ayaa lagu daraa xisaabinta dakhliga.
    - Isbitaalku wuxuu caawimaad u fidiyaa dhammaan bukaannada aan caymiska lahayn iyo kuwa leh caymiska xaddidan kuwaasoo dakhliga qoyskoodu ka yar yahay ama la mid yahay 200% Heerka Saboolnimada Dawladda (Federal Poverty Level, FPL). Bukaannada buuxiya shuruudahan waxay heli doonaan boqolkiiba 100% qiimo-dhimista kaalmada dhaqaale.
    - Bukaannada dakhliga guud iyo tirada xubnaha qoyska ay ka sarreysiiyaan 200% FPL ayaa heli doonaan kaalmo dhaqaale oo bar dhiman ah iyadoo lagu saleynayo jadwalka soo socda:

| HEERKA FPL | QIIMO-DHIMISTA |
|---|---|
| Ka Hooseysa 200% | Qiimo-dhimis 100% ah |
| 201% - 225% | Qiimo-dhimis 75% ah |
| 226% - 275% | 67.5% Qiimo-dhimis ah |
| 276% - Ka Sarre | Qorshe Lacag-bixin |

## SIDA LOO CODSADO KAALMADA DHAQAALE

1. Bukaanada waxaa looga baahan yahay inay buuxiyaan Codsiga Kaalmada Dhaqaale, isla mar ahaantaana ay u soo gudbiyaan caddey-nta(-maha)dhakhliyeed shakhsi ahaan ama boostada:
   Regions Hospital – Patient Financial Services
   Mail Stop 11102S
   640 Jackson St
   Saint Paul, MN 55101
2. Bukaannada ayaa sidoo kale ugu diri kara faakis codsiyada dhammaystiran iyo caddaynta (caddaymaha) habboon ee dakhliga Patient Financial Services (Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka) lambarka 651-254-1684.
3. Bukaannada ayaa kale ka dalban kara onlaynka iyagoo galaya akoonnada ay ku leeyihiin barta healthpartners.com.
4. Caddeynta(caddeymaha) dakhliga qoyska ee habboon waa in la bixiyaa oo ay ku jiraan nuqulkii ugu dambeeyay, cashuur-celinta Dawladda ee 1040, jeeggaga mushaar ee 60kii maalmood ee ugu dambeeyay, iyo/ama warqadda macaashka ee Sugnaanata Bulshada, macaashyada shaqa-la'aanta ama naafonimada iyo dukumiintiyada heshiiska masruufka.
5. Codsiga waxaa la buuxin karaa iyadoo la gelayo akoonka aad ku leedahay healthpartners.com account, waxaa laga daabacan karaa mareegta aan ku leenahay barta www.healthpartners.com/fa ama bukaanadu waxay nuqulka ka heli kaaan Patient Financial Services (Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka) iyagoo ka wacaya lambarka 651-254-4791. Waxaan qabanaa wicitaannada telefoon Sabtida–Jimcaha laga bilaabo 8:00 subaxnimo – 4:30 galabnimo.
6. Bukaanadu waxay kala xiriiri karaan Patient Financial Services (Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka) lambarka 651-254-4791 iyagoo weydiin kara su'aalo ku saabsan codsiga ama inay isku dubaridaan/mudeeyaan ballan ay la yeeshaan La-taliyaha Maaliyadeed oo laga wici karo 651-254-0842.

7. Waxaa la heli karaa Shaqaalaha Isbitaalka ee qaabbilsan Patient Financial Services (Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka) si bukaanada u caawiyaan iyagoo adeegsanaya khadka telefoonka ama si shakhsi ah si uu qofku u buuxiyo codsiga. Kaalmada fool-ka-foolka ah sidoo kale waa la heli karaa marka la codsanayobarnaamijyada dowladda sida Kaalmada Medicaid. Bukaanadu waxay sidoo kale la xiriiri karaan waaxda Adeegyada Shaqaalaha (Department of Human Services) ee degmada ay deggan yihiin ama waxay ka wici karaan MNsure lambarka 1-855-366-7873.

Bukaanadu waxay kala xiriiri karaan Patient Financial Services (Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka) lambarka 651-254-4791 iyagoo weydiin kara su'aalo ku saabsan codsiga ama si ay u raadiyaan goob ay wakiil ka heli karaan si ay ugu kulmaan si fool-ka-fool ah.

## XISAABINTA KAALMADA DHAQAALE

Regions Hospital wuxuu u xisaabiyaa heerka kaalmada dhaqaale ee bukaanka sida soo socota:

**Xisaabinta Qiimo-dhimista Xaddiyada Guud Ahaan La Soo Dallaco:**
Bukaanka u-qalma wixii kaalmada dhaqaale Isbitaalka laguma soo dallici doono in ka badan xaddiyada guud ee biilasha (Amounts Generally Billed, AGB) loogu talogaley bukaannada ku jira ceymiska isbitaalka ee daryeelka deg-degga ah iyo daryeelada kale ee caafimaadka ee lagama maarmaanka ah. Haatan, Isbitaalku wuxuu go'aamiyaa AGB iyadoo la isku dhuftanayo lacagaha guud ee la soo dallaco ee loogu talagalay daryeelka degdegga ah ama daryeellada caafimaad ee kale ee lagama maarmaanka ah ee la siiyo bukaanka u qalma gargaarka dhaqaale iyo boqollayda AGB [32.5%], oo ah sicir-dhimis 67.5% ah.

Tusaale ahaan: Bukaan A ayaa helay biil isbitaal $10,000 ah. Bukaan A ayaa u-qalma kaalmada dhaqaale. Regions kuma dallici doono Bukaan A in ka badan $3,250 daryeelka la xiriira biilkaas (10,000 x (AGB) 32.5%).

Isbitaalka ayaa xisaabiyay boqollaydan iyaga oo u qeybiyay isu geynta dhammaan qaansheegashooyinka daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ee ay oggolaayeen caymis bixiyeyaasha caafimaadka muddadii 12[kii] bilood ee la soo dhaafay oo loo qeybiyauy isu geynta guud ee kharashka la soo dallacay ee loogu talagalay qaanshoogashooyinkaas. Xisaabintan, waliba loo yaqaan "Habka Dib-u-Eegga", ayay xisaabisaa ayadoo Regions Hospital sannad walba.

Haddii aadan caymis ku jirin isla markaana dakhliga qoyskaaga ee sannadluhu ah ka yar yahay $125,000 doolar waxa laga yaabaa inaad u-qalanto qiimo-dhimista daryeelkaaga. Fadlan kala xiriir adeegga macaamiisha lambarka 651-254-4791 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

**Xisaabinta Qiimo-dhimista Kaalmada Dhaqaale Regions Hospital:**

1. Tirada qoyska iyo dakhliga bukaanka laga soo qaataa codsiga kaalmada dhaqaale.
2. Baaqiga Xilka Bukaanka ee ku jirta koontadooda isbitaal ayaa laga soo qaadan doonaa nidaamkayaga xogta caafimaadka elektaroonigga ah.
3. Iyada oo la isticmaalo tirada iyo dakhliga reerka, ayaan annagu xisaabinaa heerkooda ah heerka Saboolnimada Federaalka.
4. Haddii bukaanku yahay ama ka hooseeyo boqolkiiba 200% Heerka Saboolnimada Federaalka, waxay heli doonaan qiimo-dhimis buuxda (100%).
5. Haddii bukaanku ka sarreeyo 200% Heerka Saboolnimada Federaalka:
    a. Boqollayda inta dakhliga bukaanka loogu talagalay ee kharashyada caafimaadka muddo 2 sano ah ayaa lagu saleeyaa kharashka dakhliga ee la saxo iyo boqollayda ka sarraysa 200% ee Heerka Saboolnimada Federaalka. (Ka eeg shaxda loogu talagalay lacagta ugu badan ee bukaanka inuu bixiyo tahay muddo 2 sano ah.)
    b. Boqolkiiba dakhliga jira karo ayaa kadibna laga jarayaa baaqiga xilka bukaanka ah.
    c. Bukaanku ayaa markaa mas'uul ka ah bixinta baaqiga hadhasan muddo 2[da] sano ahn.

Regions Hospital

**U-QALMITAANKA SAADAASHA AH**
Regions Hospital ayaa laga yaabaa saadaal ahaan inuu go'aamiyo in bukaanku u-qalmo kaalmo dhaqaale taasoo lagu saleeyay go'aaminta hore ee la xiriirta u-qalmitaanka ama buuxinta shuruudo gaarka ah ee kaalmada dhaqaale, kuwaasoo ay ku jiraan:

- Guri-la'aanta
- Adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ee aan lagu daboolin ama bixinin barnaamijka Medicaid ama deeqda ay bixiyaan federaalku ee la siiyo qofka u-qalma
- Shuruudaha u-qalmitaanka iyo taariikhda ay billaabaneyso barnaamijka Medicaid waxay ku xigaan taariikhaha la bixinayo adeegyada
- Lammaane dhintay ama aan badbaadin

Adeegyada laga reebay waxaa ka mid ahaa adeegyada la doorto (adeegyada is-qurxinta ama adeegyada kale ee aan caafimaad ahaan lagama maarmaanka ahayn), iyo sidoo kale baaqiyada ay tahay inay bixiyaan caymiska, sida caymiska Medicare, Medicaid, caymiska baabuurta, magdhowga shaqaalaha ama mas'uuliyadda caymis. Regions Hospital waxaa laga yaabaa inuu sidoo kale isticmaalo qiyaasta iibiyaha kale ee saddexaad ee tirada qoyska iyo dakhliga bukaanka si loogu meeleeyo heerka Daboolnimada Federaalka (FPL) ee la isticmaalo ee ku qoran jadwalka kore. Regions Hospital wuxuu dooran karaa inuu oggolaado u-qalmitaanka saadaasha ah ee loogu talagalay xaaladaha bukaan ee naadirka ah ama aan caadiga ahayn ee aan si gaar ah loogu xusin FAP-gan. Marka la gaarayo go'aamada u-qalmitaanka ee saadaasha ah, haddii qiimo-dhimista saadaasha ah aysan ahayn qiimo-dhimista ugu badan ee la heli karo, Regions Hospital ayaa la socodsiin doona bukaannada oo siin doona waqti macquul ah oo loogu talogalay bukaannada si ay shakhsiyan u codsadaan kaalmo dhaqaale.

**Degganeyaasha Degmada Ramsey:**
Regions Hospital ayuu xil ka saaran yahay inuu bixiyo adeegyada Isbitaalka iyo caafimaadka degganeyaasha Degmada Ramsey, iyadoo aan la eegin awoodda lacag-bixinta qofka, sida ku cad sharciga Minnesota, heshiiska kiro ee Regions la galay Degmada Ramsey iyo sii wadida hadafkiisa muddada dheer jiray. Dadka Deggan Degmada Ramsey ee sheegta, ama la rumaysan yahay inuu dakhligoodu hooseeyo, ayaa heli doonaan daryeelka caafimaad ee degdegga ah iyo daryeelka caafimaad ee aan degdegga ahayn ee isbitaalka iyo adeegyada caafimaad iyadoo aan loo eegin awooddooda lacag-bixin. Intaas kadib, habraacyada qaan-sheegta iyo lacag soo aruurinta caadiga ah ayaa la adeegsan doonadoonaa si loo xaqiijiyo dakhliga hoose, awoodda bixint, ama heerka dhaqaale. Regions Hospital ayaa samafal ku sameeya daryeel lacag ka dhimid bukaannada dhamaystira codsiga isbitaalka, oo baahidooda dhaqaale la soo xaqiijiyo iyada oo loo maro aaladaha elektaroonigga ah iyo/ama nidaamyada iyada oo la isticmaalo shuruudo joogto ah, ama u-qalma iyada oo ku salaysan xaaladaha ay ka midka yihiin kuwa lagu soo qaaday ujeeddadan.

**Dadka Aan Ahayn Deggenayaasha Kowntiga Ramsey:**
Bukaannada aan u baahanayn adeegyada caafimaad ee daruuriga ah ayaa looga baahan doonaa inay bixiyaan macluumaadka caymiska Medicare, Medicaid, Ururka Dhowra Caafimaadka (Health Maintenance Organization, HMO) ama macluumaadka caymis ee kale; ama caddaymaha kale ee awoodda bixinta kharashka adeegyada aan caafimaad ahaan daruuriiga ahayn.

**<u>LIISKA BIXIYAYAASHA LAGA HELO ISBITAALKA</u>**

Regions Hospital waxaa looga baahan yahay inuu qoro dhammaan bixiyeyaasha adeegga ee aan ka ahayn kuwa Regions Hospital, kuwaasoo ka bixinaya adeegyada caafimaadka degdega ah, ama adeegyada kale caafimaad ee lagama maarmaanka ah iyo inuu qeexo kuwa ay yihiin bixiyeyaasha adeegga ee Xeerku khuseyso iyo kuwa uusan khuseynin. Liiska bixiyayaasha waxaa laga heli karaa dukuminti kale oo gaar ah. Bukaannada waxay codsan karaan nuqulka warqadda ah iyagoo kala xiriiraya Patient Financial Services (Adeegyada Maaliyadeed ee Bukaanka) ee Regions Hospital lambarka 651-254-4791 ama 877- 974-3600 lambarka lacag la'aanta lagu waco ama iyagoo gujinaya halkan: Liiska Bixiyeyaasha Daryeelka Ee Regions Hospital

Regions Hospital

## NIDAAMKA DARYEELKA CAAFIMAADKA DEG-DEGGA AH

Regions Hospital ayaa ugu bixisa daryeelka, takoor la'aan, xaaladaha caafimaadka degdegga ah bukaaannada iyada oo aan u eegin awoodda ay u leeyihiin lacag bixinta ama u-qalmitaanka kaalmada dhaqaale. Isbitaalku wuxuu mamnuucayaa wixii tallaabo(-oyin) ah ee la xiriira ka hor istaagitaanka dalbashada bukaanada ee adeegyada caafimaadka deg-degga ah. Tusaalooyin ka mid ah habdhaqanka la mamnuucay waxa ka mid ah: shaqaalaha ama wakiilka Isbitaalka oo bukaanada waaxda deg-degga ka dalbada inay bixiyaan lacag kahor inta ayna helin daaweynta loogu talagalay daryeelka caafimaadka deg-degga ah, ama u oggolaada hawlo dayn aruurin kuwaasoo hakad ku keena bixinta daryeelka caafimaadka deg-degga ah. Regions Hospital waa inuu u hoggaansamo dhammaan shuruudaha khuseeya Xeerka Daawaynta Caafimaad iyo Shaqada iyo Shaqaalaha (Emergency Medical Treatment and Labor Act – EMTALA), oo ay ku jiraan bixinta baaritaan hore ee caafimaad, daaweynta xasillinta, iyo u wareejinta bukaanka xarun kale marka ay habboon tahay. Regions Hospital wuxuu u bixin doonaa dhammaan adeegyada degdega ah si waafaqsan shuruudaha kaqeybgalka ee CMS (Centers for Medicare and Medicaid Services).

## NIDAAMKA BIILALKA IYO LACAG URUURINTA EE GOONIDA AH

Tallaabooyinka laga yaabo inuu qaado Regions Hospital haddii ay dhacdo lacag-bixin la'aan ayaa lagu qeexay Xeerka Biilasha Iyo Lacag Uruurinta. Nuqulka Biilasha Isbitaalka Iyo Xeerka Lacag Uruurinta ee bilaashka ah waxaa laga eegi karaa oo laga soo dejisan karaa mareegta aan ku leenahay barta www.healthpartners.com/fa